



## Ardeyda Dugsiyada Hoose waxyaabaha Caydhiska loogu Beddelayo

Guddiga Waxbarashadda iyo San Diego City Schools waxay ogsoon yihiin muhimada ay leedahay in la xoojiyo nidaamka asluubta ee ardeyda dugsiyada hoose (Fasalad X-6) ee dembiyada khatarta ah sameeya, laakiin aan lagu talin in gebi ahaanba dugsiga laga caydhiyo, in lagu sameeyo dhexgelista ku habboon si asluub-xumada ay muujiyeen loo wajaho.

Sida uu dhigeyo Sharciga Dawlad-goboleedka California iyo sharciga degmada hada ka jira, waxaa lagu wargelineyaa in maamuleyaasha dugsiyada hoose ay **waajib tahay in dembiyadan** hoos ku qoran ay ardeyda dugsiga kaga caydhiyaan:

- Haysashada, iibinta ama isticmaalka qoryaha (mid dhab ah iyo mid aan dhab ahaynba)
- Qof kale mindi ku fiqida ama tusidaba
- Iibinta waxyaabaha la manuucay (khamridu kuma jirto)
- Sameynta ama isku daysita fara-xumeynta qof kale
- Haysashada walxaha qarxa

Hase ahaatee, maamuleyaasha dugsiyada hoose waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay ku taliyaan in ardeyda dugsiga laga caydhiyo, marka uu sameeyo **dembiyada khatarta ah ee aan waajibka ahayn in lagu caydhiyo**

. Habkan "dembiyada khatarta ah" waxaa lagu qeexi karaa sidatan:

- Si ula-kac ah qof kale dhaawac gaadhsiin, marka laga reebo isdifaacida
- Dembiga saddexaad ee dagaalka ah
- Weerar gardaro ah qof shaqaalaha degmada ka mid ah ku qaadid
- Boobka iyo dhaca
- Haysashada, iibinta ama isticmaalka qori, mindi ama walax kale oo beenbeen ah
- Dembiga afraad ee haysashada ama isticmaalka tubaakada iyo walxaha nikootiinka leh
- Dembiga koowaad ee ah isticmaalka walxaha la manuucay
- Haysashada walxaha la manuucay inta ka badan inta shakhsi ahaan loo isticmaaleyo
- Dembiga saddexaad ee lagugu arko adiga oo haysta, isticmaaleya ama ay jidhkaaga ku jirto waxyaabaha la manuucay

Maamuleyaasha waxaa lagula talineyaa inay ardeyga dembiyadan khatarta ah sameeya dugsiga ka caydhiyaan, haddii kalena ugu yaraan, maamuleyaasha waxaa laga rabaa inay ardeyga demiyadaas khatarta ah sameeya dugsiga ka eryaan shan (5) maalmood. Haddii ay maamuleyaashu door-bidaan inay ardeyga eryaan oo keliya, waxaa maamuleyaasha looga baahan yahay inay dugsiga ka qabtaan koox anshaxa ardeyda toosiya, isla mar ahaantaasna, go'aamiya dhexgelista ardeyga lagu sameynayo si akhlaaqdiisa loo hagaajiyo. Xubnaha kooxdaas waxaa ka mid noqon kara la-taliyaasha, macallimiinta, kalkaaliyaasha caafimaadka, aqoonyahanada cilmi-nafsiga ee dugsiga, waalidiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga kaaliyaasha ka ah.

Waxyaabaha dhexgelista in lagu sameeyo ee la soo jeedineyo waxaa ka mid ah inay maalin kasta wada xidhiidhaan dugsiga iyo waalidka ardeyga, u gudbinta la-taliyaha degmada ama ha'ayadaha bulshada, la-talinta shakhsi ama koox yar, kooxaha korey, nidaamka waalidka ee jaaliyada, fasalada waxbarashadda waalidiinta, heshiiska asluubta ardeyda, wax-u-dhigista iyo dhexgelista waxbarashadda kale, barnaamijyada lagula talineyo, dib-u-fiirinta Qorshaha Waxbarashadda Shakhsiyeed (IEP) ee ardeyda baahida Waxbarashadda Khaaska ah qabta ama dhexgelista kale ee la heli karo.

Maamuleyaasha waxaa laga rabaa inay sameeyaan koox ardeyda arrimaha anshaxooda ku saabsan kala talisa, una diyaargaroooba sidii ay dhexgelis ugu sameyn lahaayeen 15 maalmood gudahood marka uu dembigu dhaco. Shirkaas kedib, maamuluhu waa inuu buuxiyaa **FOOMKA CAYSHISKA ARDEYGA WAX KALE LOOGU BEDDELAYO**, waana inuu nuqulka asalka ah u gudbiyaa Hoggaamiyaha Waxbarashadda, nuqulna u gudbiyaa xafiiska Meeleynta iyo Abiilka. Guddiga Waxbarashadda waxaa afartii biloodba mar la siin doonaa warbixin ku saabsan sida ay dugsiyada hoose arrintaas u hirgeliyeen. Su'aalaha ku saabsan sida dugsiyadu warbixinta u gudbiyeen waa in loo jeediyaa Hoggaamiyaasha Waxbarashadda, maadaama ay kormeerayaan sida nidaamkan loo fuliyey. *Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay Ururka Annie E. Casey Foundation*

OO KOOBAN	
❖	Maamuleyaasha dugsiyada hoose waxay ardeyda sameysa dembiyada khatarta ah ee aan-waajibka ahayn in caydhiska dugsiga laga caydhineyo wax kale loogu beddelo.
❖	Sida Sharciga Waxbarashadda ee Dawlad-goboleedka California iyo Sharciga degmadu uu dhigeyo waxaa lagu talineyaa in la caydhiyo ardeyga sameeya dembiyada waajibka ah in lagu caydhiyo.
❖	Marka habkan lagu jiro, ardeyda waxaa dugsiga laga eryayaa muddo 5 maalmood ah.
❖	15 maalmood gudahood marka dembigu dhaco kedib, kooxda anshaxa ee dugsiga oo uu hoggaamineyo maamulaha dugsiga ayaa go'aamineya dhexgelistii ku habbooneyd la sameyn lahaa, halkii ardeyga asluub-xumo loo caydhin lahaa.

#### SOMALI VERSION:: IN LIEU OF EXPULSION PROCESS

Warbixinada kala xidhiidh: xafiiska Meeleynta iyo Abiilka: (619) 725-5660  
Su'aallaha Warbaahinta: (619) 725-5578

[www.sandi.net](http://www.sandi.net)

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda..